

deegyada deg degga ah

iybta adeega degdegga ah waa qayb ku taala isbitaalika aad aadayso marka uu ku hayo xanuun daran ama aad birtid dhaawac u baahan baaritaan deg deg ah iyo daryeel. Waxaa ka mid ah:
 - Cabashooyinka
 - Fadhiga xaruntaada caafimaad haddii aad u baahantahay
 - Taageero dhanka luqadda ah marka aad iska diiwan gelinayso iyo ka hor wakhtiga balantaada.



Xanuun daran oo kugu soo booday ama dhaawac ku soo gaaray

Marka aad noqoto miyir la'aan

Marka aadan si fiican u neefsan karin

Marka uu xanuun daran ku hayo

Marka xaaladu ay aad degdeg u ahayn, dhakhtarikaaga guud ahaan isbitaalika gaar loo leeyahay oo daaweeya dhaawacyada aad mar walba ku baari kara ka dibna kugu wareejiin kara iybta daryeelka degdegga ah ee isbitaalika haddii aanay aladaada la tacaali karin.

Marka uu xanuun daran ku hayo



Marka uu xanuun daran ku hayo

Lafa jajabay ama lafa/xubnahoodu isdaba mareen

Sun si kama'a ah loo cuno ama daawo si qaldan loo isticmaalay

Dhibaatooyin daran islamarkaana aad u adag oo daawayn u baahan

Waxaa ka mid ah:
 - Cabashooyinka
 - Fadhiga xaruntaada caafimaad haddii aad u baahantahay
 - Taageero dhanka luqadda ah marka aad iska diiwan gelinayso iyo ka hor wakhtiga balantaada.

Taageerada dhanka luqadaha

Dhamaan isbitaalada waxay leeyihiin turjubaano taabaran oo uu adeegoodu yahay bilaash. Waa in aad dalbataa turjubaan ka hor balanta aad dhakhtarika la leedahay si loo sii diyaariyo. U sheeg xaruntaada caafimaad haddii aad u baahantahay taageero dhanka luqadda ah marka aad iska diiwan gelinayso iyo ka hor wakhtiga balantaada.

Cabashooyinka

Fadlan la xirii madaxa caafimaadka iyo naafada Bogga intarneetka: www.hdc.org.nz/complaints
 Telefoon bilaash ah: 0800 11 22 33

Xaq u lahaanshaha

La talinta ku qoran warqadan waxaa loogu tala galay dadka si daaim ah u degan iyo shacabka New Zealand oo kaliya taariikhda la daabacay. Haddii aadan ka mid ahayn dadkaas waxaa laga yaaba in lacag lagaa qaado. Faafaahin dheeri ah waydii ama kala soco barta: www.moh.govt.nz/eligibility

Nambarada ama xiriirada muhiimka ah.

Nambarka adeega daryeelka caafimaadka 0800 611 116
 Isbitaalika Waikato Hospital 07 839 8899
 Bukaana la roorka 111

Qiritaanada ama mahadnaqyada

Auckland Regional Public Health Service

Rātonga Hauora ā Iwi o Tamaki Makaurau




Working with the people of Auckland, Counties Manukau and Waitemata

Waxaa si isbogaadin leh u taageera:



Daryeelka caafimaadka ee New Zealand



Dhakhtar guud

Dhakhtar guud waa dhakhtar ilaaliya daryeelka caafimaad qoyska oo idii. Dhakhtar guud waa qofka ugu dhiimsan dhanka caafimaad kaaga gudaha New Zealand.

Haddii aad xanuunsantahay ama aad ka walwalsantahay caafimaad kaaga waa in aad booqataa dhakhtar kaaga guud.

Aa diiwaan geli dhakhtar guud ugu horayn sida ugu akhsaha badan marka aad timaado New Zealand. Dhakhtar guud waxaa uu kugu caawinayaa in aad ishid dhakhtar xirfadle ah isaga oo kugu wareejinayaa aitaal, kalkaaliyayaasha bulshada ama adeegyada kale ee afimaad haddii loo baahdo.

Dhakhtar guud waxaa laga helaa xarunta caafimaad bulshada dhexdeeda. Kalkaaliyayaasha iyo saraakiisha afimaad iyagana halkaas ayey ka howlgalaan. Si aad u ishid xarunta caafimaad ee kuugu dhaw, eeg qaybta kore cagaarka ee diiwaanka telefoonka.

Xarunta caafimaad waxay bixisaa adeegyo kala duwan oo ay mid yihiin:

Daryeel caafimaad oo dadka oo dhan loogu talagalay, da'a walba oo ay joogaan

Baariitaanada caafimaad ka hor xiliyada dugsiyada



Talaalada

Daryeelka hooyooyinka uurka leh

Baariitaanka marinka hoose ee minka

Waa in aad lacag bixisaa si aad u booqatid dhakhtar guud. Haddii aad haysatid kaarka daryeelka bulshada, booqashada dhakhtar waa rakhiis. Weydii qaabilaha dhakhtar guud intan. Caruurta da'adoodu ka yar tahay lix sano jir lacag yar ay dhakhtar ku booqan karaan ama lacaga la'an.

Dadka telefoonka ee daryeelka caafimaad waa adeeg mar ilba ku caawin kara haddii aadan hubin in xanuunkaagu daran yahay ama meesha aad aadayso. Turjubaanada haddii aad codsatid waad heli kartaa.

Adeegyada kale ee caafimaad

Farmasi ama dukaanka daawada/ diyaariyaha ama qaybiyaha daawada



Dhakhtar guud ama dhakhtar isbitaalka waxaa laga yaabaa in ay daawo kuu qoraan. Daawada lagu qoray la tag dukaamada daawada ee aad rabto. Qaybiyaha daawada waxaa uu kuu faafaahinayaa wakhtiga iyo sida loo isticmaalo daawooyinka. Waxaa jiri doonto lacag lagaa qaadi doono marka daawada lagu qoro. Haddii aad haysatid karka daryeelka bulshada, daawada lagu qoray waxaa laga yaabaa in ay rakhiis noqoto. Caruurta da'doodu ka yar tahay lix sano jir daawooyinka loo qoraa badankoodu waa bilaash.

Dhakhtar ka ilkaha

Caruurta ka yar 18 sano jir oo dhiganaya dugsiga ama aan shaqaynin waxay helayaan daryeel iyo daawo bilaash ah oo ilkaha ah. Canugu waa in uu ka diiwan gashan yahay adeega daryeelka ilkaha ee dugsiga. Weydii dugsiga. Qaar ka tirsan dhakhaatiirta ilkaha caruurta waxay ku daaweeyaan lacag la'aan (booqo bogga intarneetka ee Waikato DHB si aad u heshid macluumaad dheeri ah). Dadka waaweyn daryeelka ilkaha ma aha lacag la'aan.

Dhalmada

Waxaad xulan kartaa cidda aad rabto in ay ku daryeesho marka aad uurka leedahay. Dhakhtar guud waxa uu kugu caawin karaa in uu kuu helo qofka kugu haboon. Isbitaalada bulshada iyagana waxay qabaan adeega dhalmada. Baariitaanada qaar ee loo baahan yahay marka aad uurka leedahay waxaa laga yaabaa in ay qaaramo leeyihiin.

Marka u dhasho ilmaha ilaa inta uu ka gaarayo shan sano jir waxaa jira taageero bilaash ah oo uu canugaagu ku heli karo daryeel caruureed ee Tamariki Ora provider.

Si aad u heshid macluumaad dheeri ah oo ku saabsan daryeel caruureetka Tamariki Ora oo aad ka heli kartid agtaada la xirii dhakhtar kaaga guud.

Isbitaalka bulshada

Haddii uu dhakhtar kaaga guud uu kugu wareejiyay isbitaalka waxaa laga yaabaa in aad sugtid aragtida dhakhtar ka haddii xaaladdadu aanay degdeg ahayn. Dhamaan daaweynta isbitaalada bulshada waa bilaash haddii aad tahay qof meesha si daaim joogta ah u degan ama wadani ah.

Isbitaalka bulshada wuxuu bixiyaa adeegyo ay ka mid yihiin

- Balan aad la leedahay dhakhtar ku takhasusay cudur gaar ah
- Daryeelka caafimaadka dhimarka
- Adeegyada bulshada (sida kalkaaliyayaasha degmada)
- Raajo iyo baariitaano qalabsi teknooloji ah loo isticmaalayo
- Daryeelka dhalmada/Dumarka uurka leh.
- Adeegyada degdegga ah.

Dhamaan adeegyada lagama bixiyo isbitaalada bulshada waxaana laga yaabaa in loo baahdo adeega isbitaalada gaarka loo leeyahay oo qaaramo leh. Dhakhtar kaaga guud ayaa arintan kuu faafaahin doona. Isbitaalka bulshada ee kugu dhow waa Waikato Hospital waxaana uu ku yaal wadada Pembroke, Hamilton. Si aad u heshid macluumaad dheeri ah oo ku saabsan isbitaalka Waikato Hospital fadlan wac talefoon nambarka 07 839 8899 ama booqo bogga intarneetka ee gudiga isbitaalka degmada ee: www.waikatodhb.health.nz

